

# Cudurka qeybta -Lewyn

Cudurka qeybta -Lewyn waa cudur xusuusta kaga dhaca dadka da'adoodu tahay 50-80 jirada oo horumar sameeya. Magacaabistana wuxuu ka heley qeybaha Lewyn, kuwaasoo ku jira ungyada dareemayaaasha guntooda hoose, kuwaas oo jiradani ku ururiya wareega qolofa maskaxda agagaarkeeda. Sababta cudurkan dilaacisa/ soo saartana lama yaqaano.



Cudurrada xusuusta ku dhacaa waxay mar walba saameyn ku yeeshaan qoyska oo dhan iyo ehelkoodaba. Qofka hab dhaqankiisu wuxuu isku bedelaa marba sida uu cudurku u sii horumarayo. Cudurku wuxuu waxoogaa dumarka kaga badan yahay raggat

Calaamaddo badan oo cudurkan ah waxaa lagu daweyn karaa dawooyin iyo dawo la'aanba. Daryeelka wanaagsan iyo dib ucarbintuba waxay taageeraan sidoo kale tayada nolasha.

## CALAAMADHA CUDURKA WAXAA ka mid ah




Muruqyada oo tigtigma/ adkaada, talaabo qaadista oo ku adkaata iyo socodka oo ku adkaada



Dhalanteed- mala awaal, sida inuu arko waxaan jirin ama maleeyo waxaan jirin



Garashada oo ku adkaata



Ogaalka oo khalkhal ka gal, kufitaan


Cudurkan qeybta -Lewyn wuxuu calaamadaha qaarkood uga eg yahay cudurka Parkinsonka wuxuuna sidoo kale leeyahay sifooyin badan oo ka muuqda cudurka Alzheimerka . Dhibaatiyinka xusuustu waxay u sii kordhaan caadi ahaanba marba sida uu cudurku u horumaro. Cudurkani ma laha ka hortag, daaweyn ama daryeel lagu joojiyo, laakiin tusaale ahaan daryeelidda xaaladda caafimaadka, ka daaweynta calaamdaha lagu arko iyo sidoo kale firfircooni, qaab nololeedka qofka noloshiisa u dhigantaa waxay kaalmeynayaan nolol maalmeedka qofka jiran.



# Daryeelka



Daryeel iyo nidaamyo dib u carbineed waa in si wadajir ah loola qorsheeyo qofka jiran iyo ehelkiisa. Qof walba xaaladiisa nololeed iyo baahidiisu wey ka duwan tahay kuwa kale. Si joogto ah in loola socdaana waa muhiim.



Sida qaalibka ah cudurka daaweyntiisa waxaa ugu muhiimsan daryeel wanaagsan oo xaaladiisa caafimaadka ah in la siiyo sida dawooyinka saxda ah ee ku haboon, nafaqa caafimaad qabta, niyad jabka/ isku buuqsanaanta oo laga daweeyo, jimicsi iyo firfircooni iyo in loo fidiyo adeegyada kaalmeeya bad qabka caafimaadka maskaxda.

## Cudurkka qeybta-Lewyn



Ka kaalmeynta adeegyada iyo dhaqaalaha kala duduwani waxay fududeeyaan nolol maalmeedka. Dhaqaalaha waxaa ka mid ah sida in dawooyinka kharashkooda laga kaalmeeyo, howlgabka in lagu siiyo kaalmada daryeelka iyo in kaalmo lagu siiyo ehelka daryelaya. Ururka xusuustu waxay fidiyaan waxqabadyo wanaagsan oo kala duduwan.



Marxaladda bilowga cudurka in qofka mustaqbalkiisa qorshe loo sameeyaa waa muhiim. Rajada noloshiisa/ noloshiisa sida uu rabo in loo daryeelo in fursad loo siiyo soo bandhigisteeda tusaale ahaan in loo qabto wakiil u adeegga, in la qoro dhaxalkiisa iyo rajada noloshiisa sida uu rabo in loo daryeelo.

Xusuusnow, in aynan noloshaadu dhamaneynin marka lagugu xaqiijiyo jirada xusuusta, Murugada iyo niyadjabku waa dareeno dabiici ah, laakiin jirada adigoo la nool ayaad ku baran kartaa noloshaa nolol cusub.

☹️ Daryeel naftaada, adiga aya muhiim ah.

Lähteet:

[www.muistiliitto.fi](http://www.muistiliitto.fi)

[www.terveyskirjasto.fi](http://www.terveyskirjasto.fi)

[www.kaypahoito.fi](http://www.kaypahoito.fi)

Kuva ja taide: Karen Cipre

[karencipre.deviantart.com](http://karencipre.deviantart.com)



**Salon Muistiyhdistys ry**  
Muistiliiton jäsen

